# Aragtida Carraale iyo ta Gaarriye ee miisaanka maansada iyamaa mucweyn?

W/Q Cabdiraxmaan Faarax 'Barwaaqo'

-----------------------------------

1. Hordhac

Miisaanka maansadu waa xeerka fagaasa maansada ee kala duwa tixda iyo tiraabta. Haddii aan si kale u idhaa waa xeerka sheega waxay jiifto kaga duwan tahay geeraar, ama gabay kaga duwan yahay buraanbur, iwm. Haddaba, xeerkaasi maaha mid uu Carraale ama Gaarriye leeyahay ee waxa iska leh af Soomaaliga. Hayeeshee, Carraale iyo Gaarriye waxay ku dadaaleen inay helaan sida uu xeerkaasi u adeegsamo. Dooddii, haddaba, ku saabsanayd mid koodii hor helay miisaanka maansada waxan filayaa in laga soo gudbay. Loomana baahna in dib loogu xiiqo. Waxase loo baahan yahay in si dhab ah loo barto labada aragtiyood lana ogaado waxay ku kala duwan yihiin lana tilmaamo aragtida hadda ku habboon maaraynta xeerkaasi. Haddii midhkaa lagu guuleysto, waxa hubaal ah in markaasi laga warcelin karo codsigii Borof. Carraale uu dhawr madalood kaga tibaaxay ee ahaa in la kala ogaado labada aragtiyood, tiisa iyo ta Gaarriye, midda mucweyn. Haddii midhkaa la bilaabo waxan filayaa in loo gudbidoono heer aan la kala xulanayn Gaarriye iyo Carraale ee waxa la kala dooranayaa ay tahay aqoonta ay inna soo hordhigeen. Iyada oo mid kasta lagu tixgelinayo sida iyo qaabka uu u adeegsaday aragtidiisa.

Runtii ma hawl yara kala saaridda labada aragtiyood. Labada aqoon yahanna waa in dhexdhexaad loo noqdaa. Aqoontana waa inaan gef laga gelin. Aragtidayda sida qudha ee arrintaa looga eed bixikaraa waa iyada oo la adeegsado habkii loo kala saaray farahii badnaa ee la soo bandhigay kolkii af Soomaaliga la qoray oo kale. Sidaasi darteed waxa lagama maarmaan ah in la sameeyo hal-beeg lagu dhereriyo labada aragtiyood. Taasi oo innoo fududeynaysa inaan helno dhur lagu qanci karo oon qofna diidikarin.

Markaan arrintaa in badan milaalankeeda ku raagay, waxan ka wadiwaayey siddeedda qodob ee hoos ku qoran in lagu beego labada aragtiyoodba, taasi oo inoo binniixindoonta midda dhabta u dhow. Waa laygu diidikaraa waana laygu raacikaraa. Waxna waa lagu kordhinkaraa ee maaha wax aan bir ku jaray. Waxaanay qodobbadaasi kala yihiin:

------------------------------------

*Source: Journal of Somaliland Studies*

Aragtida Carraale iyo ta Gaarriye ee miisaanka maansada iyamaa mucweyn?

---

1. Aragtidu waxay ku saabsantahay.
2. Agabka loo adeegsaday maaraynteeda
3. Ereybixinta la adeegsaday
4. Xeerarka ay soo jeediyeen
5. Xidhiidhka ka dhexeeya badaha maan-sooyinka iyo siday uga hadleen.
6. Qaaciidooyinka la soo gaabiyey haddii ay jiraan.
7. Xidhiidhka ka dhexeeya xisaabta iyo miisaanka.
8. Siday aragtidu u fududaynayso ama u murginayso kala asooridda badaha maansooyinka.

## 2. Isbarbardhigga labada aragtiyood:

Haddii aan isbarbardhigno labada aragtiyood innaga oo ku beegeyna siddeedda qodob ee kor ku xusan waxa hubaal ah inaan si hawl yar u kala garandoonno golsamidooda iyo goldarradooda intaba. Haddaba bal aan ku bilaabo:

### 2.1. Aragtidu waxay ku saabsantahay

In kasta oo magaca '*miisaanka miinsada'* uu Gaarriye hor adeegsaday, Cabdillaahina markii hore adeegsaday '*gorfaynta gabayga'* haddana ujeeddadu waa isku mid oo labaduba isku wax bay ka hadlayaan. Sidaasi awgeed, qodobka u horreeya labada aragtiyoodba way fuliyeen.

### 2.2. Agabka ay labada aqoon yahan kala adeegsadeen iyo waxtarkooda

Qodobkanna waxan ku eegidoonnaa agabka ay labada aqoon yahan kala adeegsadeen. Sida hoos ku xusan labada aqoonyahan waxay adeegsadeen laba hab oo kala duwan oo kala ah:

a. Gaarriye wuxu adeegsaday *shaqallada*. Waxaanu inoo sheegay in shaqalladu yihiin waxa codka sameeya. Isaga oo arrintaa tilmaamayana wuxu yidhi:

> *Marka u horreysa waa inaynu isla garannaa inay ereyadu ka kooban yihiin shaqallada iyo shibbanayaasha. Shaqallada ayaana dhawaaqa sameeya. Kolkaas, waa iyaga waxa miisaanka gabayga doorka weyn ka qaataa.( Barwaaqo, 2007:43)*

b. Carraale wuxu isagu adeegsaday waxa loo yaqaan 'alanno' ( syllables). Kolka shibbane iyo shaqal israacaan baa la yidhaa 'alan' sida *ha, ka, ba, waa, faa*, iwm. Hayeeshee muu tilmaamin waxa codka samaynayaa waxa uu yahay. Isaga oo arrintaa ka hadlayana wuxu yidhi:

> …. *Iminka iyo haatanna, aynu ku bilawno habaynta nudda gabaygu ku xog leedahay iyo xeerarka u saldhigga ah. Aynu haddaba gudagalno e, waxa gabayga laga unkaa (iyo xubnaha kaleba) alammo la isu geeyo oo dabadeedna alkuma ereyo. Kuwaas oo hab gaar ah loo taxay ayaa dhisa hojis, ka dibna inta 'hooris lagu lifaaqo ayuu aloosmaa meeriska gabayga salka u ahi. (Carraale,2003:34).*

Carraale ma qeexin waxa kaalinta weyn ka qaata gabayga midka uu yahay. Waxa is weydiin leh waxa laaxinka samaynayaa ma alankaa mise waa shaqalka?

### 2.3. Ereybixinta la sameeyey

Carraale wuxu adeegsaday ereybixinno dhawra. Tusaale ahaan, *farcame, alan, hojis, hooris*, iwm. Kuwaasi oo dad badan ka kaalindoona dhanka garashada aragtidiisa. Dhanka kale Gaarriye isagu wax ereybixina oo la tilmaamo muu bixin. Haddii laga tegiwaayo wuxu bixiyey erey keliya. Kaasi oo ah xundhur. Waxaanu uga jeedaa inuu yahay shaqalka kala badha shaqallada jiiftada. Ujeeddadii loo adeegsadayna way ku habboontahay. Sidaasi awgeed labada aragtiyoodba qodobkan way fulinayaan.

### 2.4. Xeerarka ay soo jeediyeen

Waraysigii u horreeyey ee uu Carraale siiyey degelka www.wardheernews.com wuxu ku sheegay inaanu Gaarriye sheegin xeerka xeeriya maansooyinka. Hayeeshee, hadalkaasi waxa burinaya qoraalkii u horreeyey ee uu Gaarriye ku soo saaray wargeyskii xiddigta Oktoobatar. Isaga oo xeerarkaasi sheegayana wuxu yidhi:

***Shardiga*** *1aad:*

> *Beyd kasta oo jiifto ihi waa inuu noqdo sagaalle ama tobanleey ay xundhurtu isu dheelli tirto.*

***Shardig****a 2aad:*

> *Shaqalladu iskama filiqsana. Waxay isu raacaan hab go'an.*

***Shardiga*** *3aad:*

> *Shibbanayaasha isxigsada ama laban-laabmaa meelo gaar ah ayey ku leeyihiin tusaha jiiftada – meel walba ma galaan.*

Carraale isaga oo ka hadlaya isna xeerarka maansada fagaasa wuxu yidhi:

Maanso waa ereyga lagu magacaabo xubinta ugu mudan kuwa suugaanta Soomaalida. Waa bahda ay ku arooraan tix kasta oo dhiskeedu ku qotomo saddex heer oo kala ah:

**l**. dheellitir tiro alan iyo tu shaqal dheere,
**2**. tusmayn sugan oo shaqal dheerayaasha meerisku dhexdiisa u taxmaan iyo,
**3**. hormayn u dhiganta.

Sidaasi awgeed labada aragtiyoodba qodobkan way fulinayaan.

### 2.5. Xidhiidhka ka dhexeeya badaha maansooyinka:

Qodobkan waxan isagana ku eegi sida ay uga hadleen xidhiidhka ka dhexeeya badaha kala duwan ee maansooyinka. Sida awgeed bal aan ku horrayno:

**a. Aragtida Gaarriye**

Gaarriye wuxu sheegay inuu xidhiidh weyni ka dhexeeyo badaha kala duwan ee maansooyinka. Wuxuna bartilmaameed ka dhigtay jiiftada sida tusaalahan:

Dig dheh deelka maansada
1 1 2 (1) 2 1 1 = 9

Waxaanu yidhi, "Haddii hal shaqal lagu daro shaqallada jiiftada waxa innoo soo baxaysa hees cusub oo ah ta haanta lagu lulo, taasi oo tidhaa:

Haantii qabooy qoor yar
2 2 (1) 2 2 1 = 10

Waxa kale oo uu Gaarriye sheegay in haddii tirada shaqalla Jiiftada hal shaqal laga jaro ay haddana innoo soo baxayso hees kale oo ah ta maydhaxda lagu diirto ee tidhaa:

Naa laago laago
2 2 (1) 2 1

Markii uu hawshaa aad uga baarandegey wuxu ujeeddadiisii oo dhan ku soo koobay hal murtiyeedkan hoos ku qoran ee odhanaya:

*Mar kasta oo aad shaqal soo kordhiso ama dhinto waxaad ku turunturoonaysaa maanso cusub, maxaa qurux ku jirta afkeenna. (Barwaaqo 2007:49).*

Garaafka 1aad ee hoos ku xusan baan arrintan si cad ugu haltebinkarnaa ee bal idinkuba aad uga baarandega.

*Wax jira heeso kale oo ayana xidhiidh gaar ihi ka dhexeeyo. Tusaale ahaan, heesta maroodiga ee tidhaa:*

*Maroodi maroodi*

*1 **2 1 1 2** 1*

*Maroodi cadhoole*

*1 2 1 1 2 1*

*Haddii col la sheego*

*1 2 1 1 2 1*


*Cadaadda ku meere*

*1 2 1 1 2 1*

Haddii heestaa saddex shaqal xagga dambe lagaga daro waxa kuu soo baxaysa heestii Baarcaddaha. Tusaale ahaan:

Haddaan casarkii carraabo

(1) 2 1 1 2 (1) **2 1**




*Tiirka casi wuxu tilmaamayaa in tuduca ugu yari ka kooban yahay afar shaqal. Ka calanka ihina wuxu tilmaamayaa jiifto sagaalley oo uu Gaarriye ka dhigay bartilmaameed, kaasi oo kolka aad shaqal ku kordhiso ama ka dhinto aad la kulmayso hees cusub.*

Haddii shaqalka dheer xagga hore loo wareejo waxa inoo soo baxayaa waa geeraar ee bal u fiirso tusaalahan soo socda:

Saaxirkii kala guurraye

**2** (1) 2 1 1 2 (1) 1

**b. Aragtida Carraale:**

Carraale oo hawl yaableh qabtay marna ma tibaaxin inuu jiro wax xidhiidh ah oo badaha maansooyinka ka dhexeeyaa. Buuggiisa, miisaanka maansada Soomaaliyeed ee soo baxay 2003dii iyo qoraalladiisii kala duwanaa (Xiddigta Oktoobar, 1978) midna kuma sheegin hadal murtiyeed kooban oo aan furfurikarro. Maanso kastana iskeeda ayuu u miisaamay. Waxase la dareemayaa bado kala jaad ah oo uu isku mid u arko. Tusaale ahaan, wuxu leeyahay heesta cawsku waxay la qaab dhismeed tahay jiiftada. Waxaanu qoray sidan:

Gaashaamo iyo hawd = 6,3 iyo Cawskanaw sabool diid (-ow) = 6,3

Sidaasi awgeed qodobkan aragtida Carraale ma fulineyso.

2.6. Qaaciidooyinka la adeegsadey

Hab farshaxanka uu adeegsaday Gaarriye wuu ka duwan yahay ka Carraale. Bad kasta tusaale ayuu innaga siiyey. Inta jaad ee ay noqon kartana qaaciido kooban ayuu innoogu sheegay. Taasi oo ay tahay inuu akhristuhu furfurto oo uu balballaadhiyo. Tusaale ahaan, Jiiftada wuxu inoo sheegay inay noqoto sagaalley ama tobanley. Hayeeshee, innoomuu balballaadhin meelaha kala duwan ee ay shaqalladu kala gelayaan. Wuxuuse inna siiyey shax uu ku soo koobayo meesha ay kala gelayaan.Tusaala ahaan, Jiiftada sagaalley wuxu inna siiyey shaxankan hoos ku qoran oo kale:

| | | |
|---|---|---|
| 2 , 2 | (1) | 2 2 |
| 11 , 2 | | 11 2 |
| 2 , 11 | | 2 11 |
| 11 , 11 | | 11 11 |

*Jiifto sagaalley*

Arrintaa haddii aan aad u axadhno, Gaarriye wuu innoo saray. Innaga ayey tahay inaan saafanno. Sidaasi awgeed kolka la furfuro shaxankaasi jiifto sagaalley waxay noqonaysaa **16 jaad** oo kala goonniya sida hoos ku qoran:

Shaxan kaasi waxan u furfuri karnaa sidan hoos ku qoran (Barwaaq, 2007):

2 , 2 (1) 2 2 — Soomaali waa duub

2 , 2 (1) 2 11 — Coon maaha loo hoyan

Aragtida Carraale iyo ta Gaarriye ee miisaanka maansada iyamaa mucweyn?

---

| | |
|---|---|
| 2 , 2 (1) 11 2 | Dhuuxaa ka adagoo |
| 2 , 2 (1) 11 11 | Cawro maaha socod badan |
| 11 , 11 (1) 2 2 | Ninna kuma helaayee |
| 11 , 11 (1) 2 11 | Gobanimada hawl yari |
| 11 , 11 (1) 11 2 | Wabadar afka u saar |
| 11 , 11 (1) 11 11 | Waxaraha in lagu qalo |
| 11 , 2 (1) 2 2 | Ma cawaa ma caanaa |
| 11, 2 (1) 2 11 | Callo maaha liitiya |
| 11 , 2 (1) 11 2 | Ma cug baa ma cigashaa |
| 11 , 2 (1) 11 11 | Khamri yaanu idin hodin |
| 2 , 11 (1) 2 2 | Dhaantiyo ciyaartoo |
| 2 , 11 (1) 2 11 | Loo raro dhibaadiyo |
| 2 , 11 (1) 11 2 | Dhiilladu ka qaraweyn |
| 2 , 11 (1) 11 11 | *Ruux sacabku madhan yahay* |

Jiifto tobanleyna sidaasi oo kale waxay noqonaysaa kolka shaxanka la furfuro **16 jaad**.

| | | |
|---|---|---|
| 1 2 2 | (1) | 2 2 |
| 11 1 2 | | 11 2 |
| 2 1 11 | | 2 11 |
| 11 1, 11 | | 11 11 |

***Jiifto tobanley***

**b. Carraale:**

Carraale wuxu isna inoo sheegay inay jiiftadu tahay **shan jaad** oo qudha. Kuwaas oo kala noqonaya:

5:4, 6:3, 7:2, 8:1, 9:0. Tusaale ahaan:

Soomaali waa duub = 5:4 , Dhuuxaa ka adagoo = 6:3 , Loo raro dhibaadiyo = 7:2 Khamri yaanu idin hodin = 8:1 , Waxaraha in lagu qalo = 9:0.

Tusaalooyinka waxa ku cad in jaadka uu Carraale ka hadlayaa la mid yihiin kuwa uu Gaarriye ku magacaabay sagaalleyda. Waxa kale oo cad inaanay isku diidin tirada shaqallada. Carraale qudhiisuna

wuu sii faahfaahiyey oo wuxu tilmaamay shaqal dheere kastaa halka uu dhacayo. In kasta oo ay laba iyo soddon jaad aad uga badan yihiin shan jaad oo qudha haddana waxan odhankarnaa qodobkan labada aragtiyoodba way fuliyeen.

## 2.7. Xisaabta iyo miisaanka

Gaarriye wuxu si toosa innoogu sheegay in miisaanka maansadu ku fadhiyo xisaab iyo qaaciidooyin ee aanay ahayn wax jaantaa rogan ah. Hadalkii aan soo xusnay ee ahaa: *Mar kasta oo aad shaqal soo kordhiso ama dhinto waxaad ku turunturoonaysaa maanso cusub, maxaa qurux ku jirta afkeenna. ( Barwaaqo 2007:49), waxan kolkii hore ku caddaynay jiritaankiisa garaaf 1aad*. Kolkanna waxaynu ku caddayn xisaab ahaan. Waxana loo qori karaa sidan hoos ku cad:

***1.*** $\mathbf{Jiifto_{sagaalley\ ama\ tobanley} + 1 = \mathit{Heesta_{haanta}}}$ ***(*** *ama/* $\mathit{Jiifto_{sagaalley\ ama\ tobanley} = Heesta_{haanta} - 1}$), tusaale ahaan:

Haanyahay qaboy qooryar

2 1 1 (1) 2 2 **1**

*Laba qaar laguu kala jar*

1 1 2 (1) 2 1 1 **1**

**2.** $\mathbf{Jiifto_{sagaalley\ ama\ tobanley} + 2 = Heesta_{\mathit{Cawska}}}$ ***(***ama $\mathit{Jiifto_{sagaalley\ ama\ tobanley} = Heesta_{Cawsk} - 2}$*),* tusaale ahaan:

Cawskanow sabool diidow

2 1 1 (1) 2 2 **2**

Yaan suuqa lagu dhiginoon

2 2 (1) 1 1 1 1 **2**

Soddon lagugu baayicinoon

1 1 1 1 (1) 2 1 1 **2**

**3.** $\mathbf{H_{maqasha} = J_{sagaalley\ ama\ tobanley}} - \mathbf{\mathit{2}}$ **(**ama $\mathit{J_{sagaalley\ ama\ tobanley} = H_{maqasha} + 2}$*),* tusaale ahaan

Waxan ahay qoraa

1 1 1 1 (1) 2

Murtidaan qalaa

1 1 2 (1) 2

---

Kala qaybiyaa

1 1 2 (1) 2

Qaarba meel dhigaa

2 1 2 (1) 2

**4.** $\mathbf{H_{maqasha} - 3 = H_{hadhuudhka}}$ **(ama/** $H_{maqasha} = H_{hadhuudhka} + 3$*)*, tusaale ahaan:

Mooyaha

2 1 1

Malablaha

1 1 1 1

Magacii ?

1 1 2

Mooyaan

2 2

Tibahana

1 1 1 1

Cabban iyo

1 1 1 1

Cutiyaa

1 1 2

La yidhaa

1 1 2

**5.** $\mathbf{H_{haanta} + H_{haanta} = }$ **Gabay,** ama $\mathbf{2H_{haanta}}$ **= Gabay,** tusaala ahaan:

Adhi waa dhallaan iyo haween dhimiradiisiiye

1 1 2 (1) 2 1 1 1 * 2 1 1(1) 2 2 1

Aragtida Carraale kulama kulmin aragti qaab xisaabeed loo haltebin karo. Sidaasi darteedna qodobkan ma fulineyso.

## 2.8. Siday aragtidu u fududeynayso kala garashada badaha maansooyinka

Qodobkan waxaynu ku eegi sida ay labada aragtiyood inoogu fududeynayaan kala asooridda ama kala garashada badaha maansooyinka kala duwan. Haddii aan ku horreyno aragtida Carraale, waxad dareemeysaa inuu dhawr badood inoogu sheegey inay yihiin isku qaab sida jiiftada iyo heesta cawska. Tusaale ahaan:

**Jiifto**:

*Ruux sacabku madhan yahay = 8,1*
*Iyadoo nin sare qabo = 8,1*

**Heesta cawska**:

*Waqaan suuqa lagu dhigin (ey) = 8,1 Soddon lagugu baayicin (ey) = 8,1*

*( Miisaanka maansada, 2003, bogga 90- 93aad)**

*Carraale wuxu sabab uga dhigay inaan la tirineyn alamada labada bilood ku dhex jira oo ay luuqdu keentay, meeriskana aanay ku jirin.

Ibraahin Yuusuf Axmed 'Hawd' oo ku dadaalay inuu fududeeyo habkii uu Carraale u qeexay buuggiisa oo ay dad badani ka cawdeen baa isna sheegey in Baarcaddaha iyo heesta caanaha lagu lulaa isku qaab dhismeed yihiin. Isaga oo arrintaa ka hadlayana wuxu yidhi:

> *Labada jaad ee hoose oo kala ah **baarcadde** iyo **caano lulid** si walba waa isugu dherer iyo dhumuc, waxayna wadaagaan shan weji oo labadaba sal u ah. Haddana habdhacoodu cirka iyo dhulka ayuu isu jiraa. Ma jiro tusaale ka weyn oo lagu ogaan karo tusmaynta iyo sida ay muhiim u tahay. U wada fiirso labada heesood:*
>
> ***Baarcadde**:*
>
> *6:4 Ninkii waallaa la waa*
> *7:3 La waayoo la heli waa*
> *8:2 Hal naagtaa badhida daya*
> *9:1 Hal buluqbuluqdeeda daya*
> *10:0 Hoh iyo Boholaha Xargega*
>
> ***Caano lulid**:*
>
> *6:4 Naa baayo naa baayo*
> *7:3 Naa yaan ku baalidine*
> *8:2 Yaan bilistu ii shirine*
> *9:1 Waa maxay isgiringirintu*
> *10:0 Baranbaradukuguxayane (dhuuxidda Miisaanka maansada)*

Haddii aan tuducyada heesahaasi ku eegno aragtida Gaarriye iyana sidan bay u dhigmayaan:

***Jiifto***:

*Ruux  sacabku madhan yahay*

*2    1  1  (1) 1  1    1  1   = 9*

*Iyadoo nin sare qabo*

*1 1   2  (1)  1  1   1  1     = 9*

***Heesta cawska***:

*Waqaan suuqa lagu dhiginey**

*1    2    2   (1)**1  1    1  1   2**  = 12*

*Soddon lagugu baayiciney**

*1 1  11(1)**2 11 2*** = 11

*Gaarriye isagu wuxu ku doodayaa in alamada uu Carraale yidhi kuma jiraan heesta cawska la tirinayo oo waxa jiiftada ka duwayaaba tahay dhawaaqaasi isaga ah. Haddii dhawaaqaa laga tagana aan lagu sheegi karin inay tahay hees cawseed.

Bal markanna aan baaracaddihii iyo heestii caanaha ku bilkeedinno aragtida Gaarriye. Waxaanay u dhigmayaan sidan soo socota:

***Baarcadde:***

*Ninkii waallaa la waa*
*(1)* ***2    2    2*** *(1)   2*
*La waayoo la heli waa*
*(1)* ***2    2   1   1*** *(1) 2*
*Bal naagtaa badhida daya*
*(1)* ***2    2    1    1*** *(1) 1  1*
*Bal buluqbuluqdeeda daya*
*(1)* ***1  1   1  1    2*** *(1) 1  1*
*Hoh iyo Boholaha Xargega*
*(1)* ***11   1   1 1  1*** *(1)  1  1*

***Caano lulid:***

*Naa baayo naa baayo*
*2    2  (1)  2     2  1*
*Naa yaan ku baalidine*
*2    2   (1)   2   1 1 1*
*Yaan bilistu   ii shirine*
*2     1 1 (1) 2    1 1 1*
*Waa maxay isgiringirintu*
*2    1    1 (1) 1 1 1  1  1*

*Baranbaradu kugu xayane*
*1 1 1 1 (1) 1 1 1 1 1*

Waxa halkaasi inooga dhuroobay in kolka aragtida Gaarriye la adeegsado ay maansooyinkaasi kala qaab dhimeed yihiin. Adiguba u fiirso. Baarcaddaha waxa is xiga (1) 2 2 2 (1). Heesta kale isma xigaan.

Borof. Carraale waxa kale oo uu innoo sheegay in heesaha wiglo, hirwo, iyo dhaanto isku mid yihiin. Arrintaana, sida uu sheegay, waxa gacan weyn ka siiyey ninka la yidhaa Cali Maxamed Oday (Cali Eydh). Hase ahaatee, Ibraahin Hawd baa arrintaa ku adeegsaday aragtida Carraale. Isaga oo arrintaasi ka hadlayana wuxu yidhi:

> *Heesaha kale ee sida kuwaas hore iyaga oo isku mid ah kala jaadka la moodo waxaa ka mid ah kooxdan iswadata luuqdase lagu kala yidhaahdo:*

**b) Wiglo:**

10:4 Balaayo rag baan u badiyaayoo = 14
9:3 Birtay nimay gaadhay baan ma leh = 12

**t) *Hirwo:***

11:3 Anigu hirwo haabigeed ma hayee = 14
9:3 Haweennada haygu soo jebin = 12

**j) Dhaanto:**
10:4 Cayaar anan joogin cawdubillee = 14
9:3 Miyey carfi caado lee dahay = 12

Haddii aan aragtidaa u foodinno tii uu Cabdiraxmaan Barwaaqo ku adeegsaday aragtida Gaarriye waxa inoo soo baxaysa kala duwanaanshahooda. Aragtida Gaarriye haddii la raaco, saddexda heesood waa isku mid oo midkasta tuduca hore waa 14 shaqal ka dambana waa 12. Sidaasi awgeed, saddexduba waa heello ee midna kuwa lagu sheegay maaha. Waxase hubaal ah inay saddexduba kala jaad yihiin sida hoos ku cad:

**Wiglo:**

Hadduu balankii dhab kaa yahay

(1) 2 1 1 2 (1) 2 1 1 = 12

Biyaan jirin been ku soo sheeg

(1) 2 1 1 2 (1) 2 2 = 12

**Hirwo:**

Hadduu balankii dhab kaa yahay <u>**eey**</u>

(1) 2 1 1 2 (1) 2 1 1 <u>**2**</u> = 14

---

Biyaan jirin been ku soo sheeg**__eey__**

(1) 2 1 1 2 (1) 2 2 **__2__** = 14

**Dhaanto**:

**__Naa__** hadduu balankii dhab kaa yahayeey

**__2__** (1) 2 1 1 2 (1) 2 1 1 2 = 16

**__Hooy__**, biyaan jirin been ku soo sheegeey

**__2__** (1) 2 1 1 2 (1) 2 2 2 = 16

**Heello:**

1. Arooryada hore daruur onkoddiyo
(1) 2 1 1 1 1 (1) 2 1 1 1 1 = **14**
Ufada roobku way udgoontahay
(1) 1 1 2 1 1 (1) 2 1 1 = **12**

2. Wax badan buste saaray boogtaydoo
(1) 1 1 I 1 2 (1) 2 2 2 = **14**
Markay bogsan weydey lay baray
(1) 2 1 1 2 (1) 2 1 1 = **12**

3. Halkaad qoontaa iqiiqaysoo
(1) 2 2 2 (1) 2 2 2 = **14**
Qofkaan arko waan ka qariyaa
(1) 2 1 1 2 (1) 1 1 2 = **12**

4. Haddaanay muuqano la magac dhabo
(1) 2 2 2 (1) 1 1 1 1 1 1 = **14**
0 aan maqlo soortu way malab
(1) 2 1 1 2 (1) 2 1 1 = **12**

5. Adoo gabaniyo adoo gurilaba
(1) 2 1 1 1 1 (1) 2 1 1 1 1 = **14**
Gabawgaagu way gudboonyahay
(1) 2 2 1 1 (1) 2 1 1 = **12**

6. Dhillawyahankaa dhirtuun ka baxee
(1) 2 1 1 2 (1) 2 1 1 2 = **14**

Maxaa dhexda iigu kaa maray
(1) 2 1 1 2 (1) 2 1 1 = **12**

Hadal iyo dhammaantii waxa halkaa inooga cad inay heesaha wiglo, hirwo, dhaanto iyo heello aanay isku qaab dhismeed ahayn sida ay Carraale iyo Hawd isku raaceen. Qodobkanna sidaasi ayey aragtida Carraale wax isugu murgineysaa.

Guntii iyo gababagabadii, haddii aan si kooban shaxankan hoose ku muujinno sida ay labada aragtiyood u kala sugayaan qodobbadii aan ku beegayey waxa inoo soo baxaysa sidan:

| **Qodobka** | **1** | **2** | **3** | **4** | **5** | **6** | **7** | **8** |
|---|---|---|---|---|---|---|---|---|
| **Aragtida Gaarriye** | ✓ | ✓ | ✓ | ✓ | ✓ | ✓ | ✓ | ✓ |
| **Aragtida Carraale** | ✓ | **x** | ✓ | ✓ | **x** | ✓ | **x** | **x** |

Guntii iyo gabagabadii, waxay aragtidaasi noo hoggaamisey, aniga iyo jalahay Xuseen Liibaan, inaan aragtida Gaarriye hor marin karro. Waxananu ogaannay in loo rogikaro qorme kombuyuutar. Gu'gu kolkuu ahaa 2003dii waxannu ku guuleysanay inuu qormuhu sidii aannu rabnay u shaqaynayo. Kaasi oo aannu u bixinay Laaxinjire. Waxaananu go'aansannay inaanu ku soo bandhigno shir weynihii 10 aad ee Cilmibaadhista Soomaaliyeed laguna qabtay magaalada Colombus, Ohio ee dalka Maraykanka. In kasta oo aan qoraalkii arrintaasi ku saabsan ka akhriyey madashii ii may suurtagelin inaan soo bandhigo laaxinjire gef dhanka farsamada ah oo dhacay dartii.

Waxa ka qayb galayaashii xiiseeyey ka mid ahaa Cabdisalaan Hereri oo markaasi ka socday laanta af Soomaaliga ee idaacadda VOA-da. Waxanan siiyey waraysi kooban oo arrinkaasi ku saabsan.

Bishii labaad ee gu'gan 2010ka ayaan markii u horreysey ku soo bandhigay Jaamacadda Hargeysa ee ku taal magaalamadaxda Soomaalilaand. Waxa haddaba isweydiin leh muxuu soo kordhiyey Laaxinjire?

**Wuxu Laaxinjire soo kordhiyey in**:

- Ninkasta oo maanso curiya gefkiisa si hawl yar loo ogaan karayo, taasi oo waagii hore adkayd.
- Xawaaraha uu wax ku shirrabayo oon wax loo dhigaa jirin — inkasta oo ay ku xidhantahay jaadka kumbuyuutarka la adeegsanayo. Tusaale ahaan, maansada Dabataxan ee uu tiriyey Maxamed Xaashi Dhamac 'Gaarriye' oo ka kooban 549 tuduc wuxu ku shirrabayaa wax daqiiqad ka yar.
- Badihii maansooyinka si fudud loo kala garankarayo.
- Dhanka gefefka higgaadda uu wax weyn ka qabanayo.
- Qof kastaa uu adeegankarayo, hadduu yahay abwaan iyo haddaanu weligii laba erey isu keenin.

**Jaadadka gefefka uu laaxinjire qabanayo:**

Laaxinjire looma adeegsanayo kala asooridda jaadadka maansooyinka oo qudha ee waxa loo adeegsankaraa sixidda gefafka ama laaxinka gala maansooyinka kolka la qorayo. Tusaale ahaan, bal u fiirso tuducyadan hoos ku qoran:

a. Duur-xuli aan maayee ( laaxin baa ku jira).

Aragtida Carraale iyo ta Gaarriye ee miisaanka maansada iyamaa mucweyn?

----------------------------------------------------------------------------------------------------------------

b. Duur-xuli an maayee ( laaxin kuma jiro).

a. Dawgoo aan seegnaan (laaxin baa ku jira).

b. Dawgoo an seegnaan (Laaxin kuma jiro).

a. Stanzaw nin doorkaa ( laaxin baa ku jira).

b. Istansaw nin doorkaa (laaxin kuma jiro).


a. Dulmigii lafaa dhuuxaybaad dib u dhardhaarteene (laaxin baa ku jira).

b. Dulmigii lafaa dhuuxay baad dib u dhardhaarteene (laaxin kuma jiro).


**Sida loo adeegsanayo Laaxinjire :**

Kolka aad furto qormaha waxa kuu soo baxaysa qalwada halkan ka muuqata (qalwada 1aad). Waxa xagga sare ee qalwada ku qoran magacyada jaadadka badaha la shirrabayo oo aad ka xulankarto badda aad markaasi rabto inaad shirrabto. Tusaale ahaan, gabay, geeraar, baarcadde, jiifto, maroodi maroodi, iwm.

Kolka aad xulato jaadka badda aad shirrabayso, aad gosha (the folder) ay maansadu kuugu kaydsantahay oo soo dheego kuna dheji booyga. Intaa kadib hoos u dulundulcee (*scrolldown*) oo riix halka ay ku qorantahay ‘**gudbi**’.




**Qalwada 1aad**




**Qalwada 2aad**


Haddii ay maansadu wada qummantahay oo aanu wax laaxinihi ku jirin waxa kuu soo baxaysa maansadii oo khad wada calan ah ku qoran sida ka muuqata qalwada 2aad.

Tuducyada laaxinku galaa waxay ayagu ku qormayaan midab maarrin ah sida ka muuqata qalwada 3aad




**Qalwada 3aad**

Haddii aad gef samayso oo aad shirrabto maanso aan ahayn baddii aad rabtay dhurta kuu soo baxaysaa waa qoraalkii oo kuwada qoran midab maarriin ah sida ka muuqata qalwada 4aad.




Qalwada 4aad

Ugu dambayntii, qoraalkan waxan kaga hadlay sida ay labada aragtiyood ee Carrale iyo ta Gaarriye u kala mucweyn yihiin aniga oo soo jeediyey hal-beeg lagu kala saarikaro. Waxanan tilmaamay sida ay aragtida Gaarriye, ilaa hadda, u tahay mid la sii hormarin karo oo inna tusaysa xidhiidhka ka dhexeeya badaha kala

duwan ee maansooyinka Soomaaliyeed. Arrintaasi oo aniga iyo Jalahay Xuseen Liibaan nagu qancisay in aragtida Gaarriye loo rogikaro, haddii aan si kale u idhaana, lagu qorikaro afka kombuyuutarka. Ugu dambayntiina waxay aragtidaasi noo hagtay sidii iyo habkii uu ku soo baxay Laaxinjire oo ah qorme si hawl yar loogu adeegsankaro sixidda maansooyinka iyo kala asooridda badahoo-daba.

## Raadraac

Cabdillaahi Diiriye Guuleed 'Carraale', Miisaanka Maansada Soomaaliyeed, 2004, Sweden

---, "Hawraarey Ninba Si Kuu Qaaday," *Xiddigta Oktoobar* 6:119 (Mogadishu, Somalia: Ministry of Information and National Guidance, 10 June, 1978): 3.

---, "Hawraarey Ninba Si Kuu Qaaday: Qabta Labaad," *Xiddigta Oktoobar* 6: 120 (Mogadishu, Somalia: Ministry of Information and National Guidance, 11June, 1978): 3.

---, "Gabaygeenna Miisaan," *Xiddigta Oktoobar* 6)26 (Mogadishu, Somalia: Ministry of Information national Guidance, 18 June, 1978): 3.

---, "Gabaygeenna Miisaan: Qaybta Labaad," *Xiddigta Oktoobar* 6: 134 (Mogadishu, Somalia: Ministry of Information and National Guidance, 28 June, 1978): 3.

---, "Jiiftadana Miisaan," *Xiddigta Oktoobar* 6:149 (Mogadishu,' Somalia: Ministry ofInformation and National Guidance, 16 July, 1978): 3.

---, "Jiiftadana Miisaan: Qaybta Labaad," *Xiddigta Oktoobar* 6:150 (Mogadishu, Somalia: Ministry of Information and National Guidance, 17 July, 197~): 3.

---, "Dhaantadana Miisaan, "*Xiddigta Oktoobar* 6: 164 (Mogadishu, Somalia: Ministry of Information national Guidance, 2 August, 1978): 3. [For the second half of this article, see under "Suugaanta Soomaaliyeed.

---, "Suugaanta Soomaaliyeed: Qaybta Labaad," *Xiddigta Oktoobar* 6:165

(Mogadishu, Somalia: Mmistry of Information and National Guidance, 3August, 1978): 3. [For the first half of this article, see under' 'Dhaantadana Miisaan. "

---, "Heelladana miisaan," *Xiddigta Oktoobar* 6:172 (Mogadishu, Somalia: Ministry of Information and National Guidance, 12 August, 1978): 3.

---, "Heelladana Miisaan: Qaybta Labaad," *Xiddigta Oktoobar* 6: 173 (Mogadishu, Somalia: Ministry of Information and National Guidance, 13 August, 1978): 3.

---, "Geeraarka iyo Miisaankiisa," *Xiddigta Oktoobar* 6: '190 (Mogadishu, Somalia: Ministry of Information and National.Guidance, 2 September, 1978): 3.

---, "Geeraarka iyo Miisaankiisa: Qaybta Labaad," *Xiddigta Oktoobar* 6: 191 Mogadishu, Somalia: Ministry of Information and National Guidance, 3 September, 1978): 3.

---, "Buraanburka iyo *Miisaanki.isa,"Xiddigta Oktoobar* 6:247 (Mogadishu, Somalia: Ministry of Information and National Guidance, 8 November, 1978): 3. [For the second half of this article, see under "Hojis iyo Hooris Buraanbur.

---, "Hojis iyo Hooris Buraanbur," *Xiddigta Oktoobar* 6:248 (Mogadishu, Somalia: Ministry oflnformation and National Guidance, 9 November, 1978): 3. [For the first half of this article, seeunder "Buraanbur iyo Miisaankiisa."

---, Gorfaynta Maansada [Analysis of Poetry*]* (Mogadishu, Somalia: Academy of Culture, Ministry of Higher Education and Culture). [forthcoming]

Cabdiraxmaan Faarax 'Barwaaqo', *Kumaa ah aabbaha miisaanka maansada Soomaaliyeed, Ma Carraale mise Gaarriye?* 2006, Dhaxalreeb 3 www.redsea-online.com

----, "Miisaanku waa furaha kala asooridda badaha maansooyinka Soomaaliyeed, 2007, Dhaxalreeb II. www.redsea-online.com

Ibraahin Yuusuf Axmed "Hawd", *"Dhuuxidda Miisaanka Maansada"* Diis.16, 2008,

www.redsea-online.com,

John W. Johnson 'Heello', *'Somali Prosodic System' Horn of Africa* Volume 2, No.3 pp. 46-54.

Maxamed Xaashi Dhamac (Gaariye), Toddobaadkan iyo Suugaanta:Miisaanka Maansada," *Xiddigta Oktoobar* (Mogadishu, Somalia: Ministry of nation and National Guidance, 17January, 1976): 3.

---Todobaadkan iyo Suugaanta: *Miisaanka Maansada*," *Xiddigta Oktoobar, M*ogadishu, Somalia: Kiinistry *of* mfonnation and National Guidance, 24 . ' 1976): 3.

---Todobaadkan *iyo* Suugaanta: Miisaanka Maansada," *Xiddigta Oktoobar,* Mogadishu, Somalia: Ministry of mfonnation and National Guidance, 31, 1976): 3.

---Toddobadkan iyo Suugaanta: Miisanka Maansada," *Xiddigta Oktoobar, M*ogadishu, Somalia: Ministry of Infonnation and National Guidance, 7 y, 1976): 3.

---Toddobaadkan iyo Suugaanta: Miisaanka Maansada," *Xiddigta Oktoobar, M*ogadishu, Somalia: Ministry of Infonnation and National Guidance, 14, 1976): 3.

---Toddobaadkan iyo Suugaanta: Miisaanka Maansada," *Xiddigta Oktoobar, M*ogadishu, Somalia: Ministry of Infonnation and National Guidance, 27

--- Toddcbaadkan iyo Suugaanta: Miisaanka Maansada," *Xiddigta Oktoobar*6 (Mogadishu, Somalia: Ministry of Infonnation and National Guidance, 3 ~, 1976): 3.

---Toddobaadkan iyo Suugaanta: Miisaanka Maansada," *Xiddigta Oktoobar 0* (Mogadishu, Somalia: Ministry of Infonnation and National Guidance, 8 y, 1976): 3.

---"Toodbaadkan iyo Suugaanta: Miisaanka Maansada," *Xiddigta Oktoobar* 4: \ (Mogadishu, Somalia: Ministry of Infonnation and N - ,inn-I Guidance. 29 \T, 1976): 3.

Aragtida Carraale iyo ta Gaarriye ee miisaanka maansada iyamaa mucweyn?